# Warbixinada qoran ee ardayda u baraneysa Ingiriiska luuqad dheeraad ahaan ama lahjad ahaan K-10

## Macluumaadka loogu talagalay xanaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Gacaliyayaal xanaaneeyayaal iyo waalidiin

Waxaad ka helaysaan laba warbixinood oo qoraal ah dugsiga ilmahaaga sannad kasta. Warbixinadaan waxay kaa caawin doonaan fahamka sida ilmahaagu uu u horumarayo iyo ilaa intuu dugsigaagu taageerayo waxbarashada ilmahaaga. Warbixin kasta waxay muujineysaa horumarka ilmahaaga ee dhammaan maadooyinka.

### Warbixinada ardayda u baranaysa Ingiriiska luuqad dheeraad ahaan ama lahjad (English as an additional language or dialect (EAL/D))

Haddii ilmahaagu uu u baranayo Ingiriiska sidii luuqad dheeraad ahaan ama lahjad (EAL/D), warbixinta ayaa sharxi doonta sida horumarka luuqadooda looga taageerayey iyo ilmahaaga horumarkiisa barashada luuqada Ingiriiska. Ardayda dhigata fasalka 1-aad iyo wixii ka sareeya warbixintu waxaa sidoo kale ku jiri doona halkay hadda ka marayso aqoontada luuqada Ingiriisku. Wejiyadu waa billow, soo socda, horumaraya ama xoojinaya. Fadlan eeg warqada kore ee sharxaysa wejiyadaan.

### Warbixinada ardayda dhowaan timid (EAL/D)

Haddii ilmahaagu uu ku jiro barnaamijka EAL/D oo uu dhiganayey dugsi Australiyaan ah afar teeram ama wax ka yar, warbixinta qoraalka ah ee ilmahaaga waxaa laga yaabaa inay ku jiraan faallo ku saabsan horumarkooda maadooyinka ay baranayaan oo aan ahayn fasalkooda.

### Warbixinada ardayda dhowaan timid EAL/D Xarumaha Ingiriiska Degdega ah ama Ingiriiska degdega ah ee Dugsiga Sare

Haddii ilmahaagu uu ka diiwaangashan yahay Xarunta Ingiriiska Degdega ah ama Ingiriiska Degdega ah ee Dugsiga Sare, waxaad heli doontaa warbixin qoraal ah oo ku saabsan horumarkooda Ingiriis barashada. Waxaa taas sii weheliya, warbixintu waxay muujin doontaa horumarka dhammaan maadooyinka ay barteen udiyaar garowga dugsiga sare.

| Wajiyada Xirfada Luuqada Ingiriiska | |
|---|---|
| **Bilow** | Ardayda ku jirta wejiga bilowga ah waxay bilaabayaan inay Ingiriiska bartaan. Waxay ku hadli karaan hal ama luuqado ka badan oo aan Ingiriis ahayn waxaana laga yaabaa inay leeyihiin heer da'daas ku haboon oo ah wax qoris iyo akhris oo ku haboon luuqadooda koowaad. Ardaydani waxay bilaabayaan inay ka qaybgalaan hawlaha luuqada sahlan ee manhajka. |
| **Soo socda** | Ardayda ku jirta wejiga soo socda waxay leeyihiin aqoon kordheysa oo Ingiriis. Ardaydani waxay ku hadli karaan hal luuqad ama ka badan oo ngiriis aasaasi ah, waxayna leeyihiin aqoon kordheysa oo ah Ingiriiska qoraalka ah. Ardaydan waxay awoodaan inay ka qaybgalaan nashaadka fasalka dhexdiisa ah oo ay la falgalaan waxbarashada marka la siiyo luuqad baris ku haboon iyo wakhti dheeraad ah oo ay ku dhammaystiraan waxqabyada fasalka. |
| **Horumaraya** | Ardayda ku jirta wejiga horumaraya waxay ku hadli karaan hal ama luuqado ka badan, oo uu ku jiro Ingiriis hawleedka, ayna leeyihiin aqoon soo koreysa oo ah Ingiriiska qoraalka ah. Ardaydaani waa ka qaybgalayaasha firfircoon ee fasalka dhexdiisa iyo waxyaalaha dugsigu sida joogtada u sameeyo, waxayna awoodaan inay la falgalaan hawlaha waxbarasho ee leh ku guuleysiga koraya. Luuqadooda koowaad way sii socotaa inay noqoto taageero qiimo leh intay sameysanayaan kontoroolka naxwaha Ingiriiska iyo dhisida erayadooda. |
| **Xoojinta** | Ardayda wejiga xoojinta maraysa waxay ku hadli karaan hal ama luuqado ka badan, oo ay ku jiraan Ingiriiska waxayna leeyihiin aqoon wanaagsan oo Ingiriiska qoraalka ah. Ardaydani waa ka qaybgalayaasha madaxa bannaan ee fasalka iyo waxyaalaha dugsigu uu si joogto ah u sameeyo, waxayna leeyihiin awood korortay oo ay ku isticmaalaan Ingriiska si ay ula falgalaan waxbarashada oo leh guul guud. Waxay fahmayaan oo ay soo saaraan qoraallo qoran iyo kuwo hadal ah oo kala ah ujeedooyin khaas ah oo kala duwan laakiinse weli waxay u baahan yihiin luuqad barid xoog la saaray iyo istaraatijiyo taageeraya ardayda EAL/D, maadaama ay tahay luuqada noocyada maadooyinka waxbarasho way jordhaan. |

## Adeegga Turjumaanka Taleefanka

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka sii badan fadlan la xiriir dugsiga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya inaad la xiriirto dugsiga, fadlan ka wac Adeegga Turjumaanka Taleefanka 131 450 weydiisana turjumaan luuqadaada ah. Turjumaanka ayaa wacaya dugsiga wuxuuna ku jiri doonaa khadka taleefanka si uu kaaga caawiyo wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.